

# Barnaamijka Cimilo xakamaynta ee U Qalmay Dakhliga



## Ku bilow hadda dib u eegis koronto oo BILAASH ah!

**Cimilo xakamaynta gurigaaga waxay ka dhigi kartaa mid koronto ku filan haysta waxayna kaa caawin kartaa inaad lacag kaydsato.**

Barnaamijka Cimilo xakamaynta wuxuu ujeedkiisu yahay inuu ka caawiyo milkiilayaasha iyo kiraystayaasha u qalma ee dakhligoodu hooseeyo inay yareeyaan kharashaadka korontada iyagoo kordhinaya waxtarka korontada ee guryahooda. Haddii adiga ama qof aad taqaanid uu u qalmo, barnaamijkani wuxuu bixiyaa dib u eegis koronto guriga oo **BILAASH ah wuxuuna ka koobnaan karaa horumarino aan WAX KHARASH AH LAGAA RABIN.**

### Dheefaha

Iyadoo ay qayb ka tahay dib u eegista korontada BILAASHKA ah farsama yaqaan khibrad leh ayaa laga yaabaa inuu sameeyo adeegyada soo socda:

- Qiimeyn faahfaahsan oo saqafka sare ah.
- Baarida dhismaha si loo ogaado suurtagalnimada daadashada kaarboon monoksaydhka
- Tijaabada hawo baxsodka albaabka
- Sawir qaadista kulaylka iyo sawiridda iftiinka shucaaca

Tallaabooyinka kaydinta korontada ee laga yaabo in si BILAASH lagugula taliyay ee barnaamijkani waxaa ka mid ah:

- Dahaaridda saqafka iyo darbiyada kulaylka nuuga
- Hagaajinta, dayactirka, ama beddelidda sistamka kuleylinta
- Beddelidda haamaha biyaha kululeeya
- Xiritaanka meelaha hawadu ka baxdo
- iyo qaar kaloo badan

### U qalmitaanka

- Waa in uu yahay milkiile guri ama kirayste ku sugan aagga adeegga CenterPoint Energy
- Waa in uu hadda ka diiwaangashan yahay islamarkaana uu ka helayo kaalmo koronto Barnaamijka Kaalmada Korontada (EAP) ee Wasaaradda Ganacsiga Minnesota.

Shuruudaha iyo xeerarka ayaa ku dabaqma.

**Wax badan ka baro**  
**QualifyToWeatherize.com.**



**Codso Dheefta  
Kaalmada Korontada**



**Tilmaamaha Kaalmada  
Korontada**



# Tani sidan guriga korontada fiican leh

Mashiin qubays oo qulqul yar



Kulayl nuuge



Hawo baxsodka



Mashiinnada yareeya qulqulka biyaha ee jikada iyo musqusha



Dhagxaanta dharka qallajiya ee dhogorta ah

Kululeeye ootamaatig ah



Dayactirka sistamka kuleylka ama beddelka



Macaamiil kasta oo dhameeya dib u eegista koronto wuxuu helayaa qalab kaydinta tamarta si uu uga caawiyo inuu xitaa kaydiyo koronto dheeraad ah. Alaabada ku jirta xirmada waxaa ka mid ah: mashiinka qubeyska oo biyo yar sida, mashiinnada yareeya qulqulka biyaha ee jikada iyo musqusha, marada daaqada, laba suuf oo loogu talagalay godadka korontada iyo badhamada, kubadaha qallajiyaha ee dhogorta ah, koollo xadhig ah, iyo qalab cabbira heerkulka haanta biyaha kululeysa.

## Talooyin iyo qalabyo fudud oo kaydiya korontada ayaa kaa caawin kara inaad si weyn u yareyso isticmaalka tamarta gurigaaga!



Hagaaji heerkul dhexeeyaha adigoo dib ugu celinaya 7–10°F habeenkii ama marka aad maqantahay ugu yaraan siddeed saacadood si aad u yareyso kharashaadka kululeynta.



Ku rakib suufyada uumatada meelaha korontada gadaashooda si loo xiro meelaha hawadu ay ka baxayso.



Jooji qulqulka iyo meelaha hawadu ka baxayso adigoo adeegsanaya koollo iyo suunka cimilo xakamaynta si aad guriga ugu dhigto kuleyl xilliga jiilaalka ama aad u qaboojiso xilliga xagaaga.



Marka aad dhaqayso dharka, beddel dejinta heerkulka adigoo kuleylka ku beddelaya qandac oo had iyo jeerna si buuxda u dhaq.

Booqo [CenterPointEnergy.com/EnergySavingTips](https://www.CenterPointEnergy.com/EnergySavingTips) wixii talooyin dheeraad ah!



Wax badan ka ogow barnaamijyada kale ee laga yaabo inaad u qalanto adigoo booqanaya [CenterPointEnergy.com/IQ](https://www.CenterPointEnergy.com/IQ) ama wac khadka macaamiisheena ee 612-321-HOME.

